FSAU
Qaybta Falanqaynta Hubinta Cuntada ee Soomaaliya

# Hubinta Cuntada & Nafaqada

Waxa la soo saaray bisha Siddeedaad 25, 2006

## Warbixin Gaarh ah – Falanqynta Guga 2006 Kadib

Cimilada

Suuqyada

Nafaqada

Beeraha

Xoolaha

Arrimaha Gobolka ee Soo Shaacbaxaya

**Cinwaanka:**
**FSAU - Somalia**
**Kalson Towers, Parklands**
**Box 1230 Village Market**
**Nairobi, Kenya**
**Tilifoonka:**
**+254 20 374 5734**
**Faakiska:**
**+254 20 374 5098**
**Iimayka:**
**fsauinfo@fsau.or.ke**
**www.fsausomali.org**

### Tilmaamaha

Warbixintan gaarka ah ee FSAU waxay tilmaan ka bixinaysaa natiijooyinka ugu muhiimsan ee Qiimayntii iyo Falanqayntii Guga 2006 ka dib, taasoo ka soo baxday Howlo gudaha laga qaybtay (22kii bishii Lixaad - 22kii bishii Toddobaad), aqoon iswaydaarsiyo ah Heer Gobol iyo Heer Qaran (11-20 bishii Toddobaad iyo 23-28 bishii Toddobaad siday u kala horreeyaan) iyo hubin xagga farsamada ah oo lala sameeyey hay'adaha la isbahaysto (1- 4 bishii Siddeedaad). FEWS NET Soomaaliya, oo ay weheliyaan in ka badan 40 hay'adood oo la is bahaysto, oo ay ku jiraan maamulka gobollada, hay'adaha caalamiga ah, ururrada aan dawliga ahayn ee gudaha iyo kuwa caalamiga ah ayaa ka qayb qaatay taageerayna howsha qiimaynta iyo falanqaynta ee Guga 2006 Kadib.

Warbixintan gaarka ahi waxay daba socotaa dhowr jeer oo lagu soo bandhigay natiijooyinka kulmada ay ka midka yihiin Shir Gaar ah oo ay yeesheen SACB FSRD (9kii bishii Siddeedaad), kulanka UN OCHA/IASC (8dii bishii Siddeedaad), Kooxda howl-fulinta ee Qaybta Cuntada iyo Hab-nololeedka ee CAP/NAF (17kii bishii Siddeedaad), lix jeer oo natiijooyinka laga bandhigay gobollada (waxa lagu qabtay Hargeysa, Garoowe, Baydhaba, Hiiran, Muqdishu, iyo Bu'aale) iyo War Saxaafadeed ay soo wada saareen FSAU iyo FEWS NET Soomaaliya (15kii bishii Siddeedaad '06). Khariidadda Qoondaynta Xaaladda iyo qiyaasta tirada daweynaha oo ku salaysan heer gobol, heer degmo, iyo goob habnololeed iyo falaqaynta qaybaha iyo gobollada, waxa laga helayaa websaytka FSAU.

### NATIIJOOYINKA UGU MUHIIMSAN

Falanqayntii Guga 2006 kadib, Qaybta Falanqaynta Hubinta Cuntada ee Soomaaliya (FAO/FSAU) iyo FEWS NET Somaaliya waxay xaqiijinayaan saadaashii hore (War Saxaafadeedkii June 2, 2006) ee ahaa in inkasta oo xoogaha horumar ahi ka jiro goobaha qaar, haddana in xiisad bina-aadamnimado ay wali ka jirto Koonfurta Soomaaliya iyo inay ku wadi doonto sidaas illaa ugu yaraan inta laga gaadhyo bisha Labiyo-tobnaad 2006. Guudahaan **1.8 malyuun oo qof** ayaa u baahan gargaar bina'aadamino iyo taageero hab-nololeedka ah oo degdeg ah ugu yaraan illaa inta laga gaadhayo dhammaadka bisha Labiyo-tobnaad 2006. Tiradan, qiyaastii **1.4 malyuun oo qof** oo jooga Gobollada Waqooyiga, Dhexe, iyo Koonfurta Soomaaliya waxay ku wadaan inay soo foodsaartay xaalado ah **Gurmad Bina-aadamnimo** ama **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo aad u xumi,** iyadoo qiyaastii **400,000** ay yihiin **Dad Gudaha Ku Barakacay.**

Xiisaddu waxay aad u xuntahay koonfurta oo 80% ka mid ah tirada guud ee ah 1.4 malyuun oo qof ay joogaan ama **1.1 malyuun oo qof** ay u baahanyihiin gargaar bina-aadamnimo iyo taageero hab-nololeedka ah oo degdeg ah. Tiradan **1.1 malyuun** ee qof ee ku jira xiisadda, 425,000 waxay ku jiraan **Gurmad Bina-aadamnimo 680,000 oo qofna Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo aad u xun**. Hase yeeshee, xaaladda Koonfurta Soomaaliya guud ahaan hore ayay u martay taniyo falaqayntii Dayrtii '05/06, taasoo ku muuqata in 50% ay hoos u dhacday tirada guud ee dadweynaha ku jira Gurmad Bina-aadamnimo – tiradaas oo hoos uga soo dhacday qiyaastii 915,000 ee Dayrtii '05/06. Horumarka guud waxa kale oo uu ku muuqdaa Gobolka Gedo oo ka baxday heer diigniin hore oo Halis Dhexdhexaad inay ugu jirtay Macaluun. Dhinaca kale, waxa jirta in 60% ay kordheen tirada dadka ku jira Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo aad u xun iyagoo ay ka baxay xaalad ah Gurmad Bina-aadamnimo una gudbay xaalad ah Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo aad u xun, iyo iyadoo ay sii xumaanayso xaaladda dadka gobollada Hiiraan iyo degmooyinka Badhaadhe iyo Kismaayo ee gobolka Jubbada Hoose.

Gobolka Hiiraan qiyaastii 125,000 oo qof oo ah xoola-dhaqato, beer-iyo-xoola-dhaqato iyo hab-nololeedka webiyada ayaa iminka ku jira **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo aad u xun.** 30,000 oo qof oo kale oo jooga goobaha webiyada iyo beero-iyo-xoola-dhaqataduna waxay Halis Sare ugu jiraan inay galaan xaalad ah G**urmad Bina-aadamnimo** inta ka horraysa Bisha Laba-iyo-tobnaad ee 2006. Shabeellooyinka, beero-iyo-xoola-dhaqatadu waxy ku jiraan **Digniin Hore oo Heer Indo-ku-hayn ah**, kadib dalagga roobka ku baxa markii lagu guulaysan waayay. Xaaladaha daaqa iyo biyaha ee goobaha dhaqan ahaan ay xooluhu daaqaanna way sii xumaanayaan.

Goobaha ku jira Gurmad Bina-aadamnimo ee koonfurta Soomaaliya, xaaladda nafaqadu aad ayay u xuntahay marka loo eego wadarta Nafaqa-darrada ee hadda taagan iyadoo meelaha qaar heerarka nafaqa-darradu ka badan yihiin 20% (**Khariidadda 4**). Natiijada ka soo baxday roobabka ugu muhiimsan ee Guga, oo ay weheliyaan sida badan ee ay hantidu u luntay (dhimashada lo'du waxay ahayd 40-60%) iyo deynta dadka lagu leeyahay macnaheedu waxa weeye in dib-u-soo-kabashada buuxda ee gaar ahaan bulshooyinka xoola-dhaqatadu ay qaadan karto dhowr sannadood.

**Jiritaaka iyo baaxadda ama faahsanaanta colaadu** wuxuu noqon doonaa qodob muhiim ah oo taabanaya xaaladda bina-aadamnimada ee soo shaac-baxaysa dhowrka bilood ee soo socda. Haddii ay sii koradho xiisadda siyaasaddu oo ay keento colaad balaadhan iyo inuu qasmo ganacsiga ka dhexeeya gobolladu, saamaynta ay ku leedahay xaaladda bina-aadamnimadu waxay noqon doontaa mid aad u xun. Haddii ay dhacdadaasi timaaddo ***tirada dadka ay soo food saarayso xiisad bina-aadamnimo waxa dhici karta inay labanlaabanto***. Tani waxay dheerayn doontaa muddada ay xiisaddu jirto, waxa kale oo ay sii wiiqi doontaa adkaysiga dadweynaha iyo awooddooda maaraynta dhibaatooyinka aayaha dambe.

Haddii ay dhacdada ugu xumi timaaddo, waxa kordhi doonta tirada dadka barakacay ee u gudbaya dalalka deriska ah, taasoo markaas sii xumaynaysa xaaladda dalalkaas. Sidaas darted, haddii ay dhacdo **colaad balaadhani** bilaha soo socda waxa imanaysa in **halis dhexdhexaad oo ah in la galo xaalad Gurmad Bina-aadamnimo ah** taasoo **heerkeeda iyo baaxaddeedu ay aad uga sarrayn doonaan sidii hore ee dhammaan Gobollada Dhexe iyo Koonfurta Soomaaliya (Khariidadda 1).**

**SAAMAYNTA JAWAAB-CELITNA:**

- **Dadwynaha ku jira Gurmad Bina-aadamnimo** – waxay u baahanyihiin in la sameeyo howl-qabdyo degdeg ah oo istaageera oo ku aaddan baahida degdegga ah, sida fursad-u-helid sidii hore ka badan in loo helo cuntada, iyo in la taageero qaybaha kala duwan ee ay ku jiraan biyaha, hoyga, daryeelka nadaafadda iyo caafimaadka. Dadweynahaasi waxay u baahanyihiin ilaalin degdeg ah in laga siiyo inaanay si buuxda u waayin hantidooda, si loo hubiyo dib-u-soo kabasho aayaha dambe.

- **Dadweynaha ku jira Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun** – waxay u baahanyihiin howl-qabadyo degdeg ah oo lagu taageerayo hab-nolnoleedyada iyo in la joojiyo inay si buuxda hantida hab-nololeedku u lunto. Tan waxa laga yaabaa inay ku jirto howl-qabadyo xeelad ku dhisan oo qaybaha ah, oo ay ku jiraan dayactirka ceelasha iyo biyo-galeennada, in la taageero bannaynta dhulka beeraha ee aanay wax ku beerrayn iyo horumarinta mashaariicda waraabinta, fududaynta fursad u heleed dheeraad ah in loo helo deyn lacag ah iyo fududaynta bixinta deynka. In hore loo mariyo fursad-u-helidda adeegyada caafimaadka ee dadka iyo xoolaha, iyo waxyaabo kale oo ku xidhan xaaladaha ka jira gobollada iyo hab-nololeedyada.

- **Jawaabcelinta Arrimaha Saamaynta Badan leh-**
  - **In dib loogu howl-galo lana kordhiyo howlaha dadaalka ah ee ku aaddan Nabadda -** In la kordhiyo dadaalka iyo u howl-galka nabadda iyo ka hortagga collaadda ee ah heer qaran iyo heer caalami ahba. Marka la eego saamaynta muhiimka ah ee ay colaad balaadhani ku yeelan karto, xaaladda hadda taagan ee bina-aadamnimada ee ka sii jirta Koonfurta Soomaaliya inay sii xumaato, waxa weeye in mudnaan sare la siiyo.
  - **In dib loo eego loona hadlo sidii loogu heli lahaa xal sababaha ka dambeeya xiisaddan** –Tallaabooyinka la qaadi karo waxa ku jira xasillooni siyaasadeed, iyo maqnaanshaha hay'ado dawli ah oo howl kar ah; waxyeellada weyn ee cimilada loo gaysanayo ee ku dhow inaan dib looga noqon karin, gaar ahaan dhirta seeraha ee loo jarayo in dhuxl laga soo saaro; iyo adeegyada dadweynaha ee xumaaday ama burburaya.

**Sanduuqa 1: Qiyaasta Dadweynaha Gobollada ee ku jira Gurmad Bina-aadamnimo (GB) iyo Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (XCHAX), oo ay wehiliyaan Kooxaha ku jira Halis Sare.**

| Golloada Saamoobay | Qiyaasta Dadweyna Gobollada Saamoobay [1] | Qiyaasta la qiimeeyey iyo ta ku meelgaadhka ah ee dadweynaha ku jira XCHAX iyo GB | | |
|---|---|---|---|---|
| | | Xiisad Cuntada & Hab-nololeedka ah oo aad u xun (XCHAX) [2] | Gurmad Bina-aadamnimo (GB) [2] | Wadarta ku jira XCHAX ama GB oo ah % Dadweynaha Gobolka |
| **Waqooyi** [3] | | | | |
| **Bari** | 387,969 | 30,000 | 0 | 8 |
| **Nugaal** | 125,010 | 10,000 | 0 | 8 |
| **Sanaag** | 270,367 | 25,000 | 0 | 9 |
| **Sool** | 150,277 | 25,000 | 0 | 17 |
| **Togdheer** | 402,295 | 20,000 | 0 | 5 |
| **Xeebaha (Kaluumaysiga)** | | 20,000 | | |
| **ISKU-DAR** | ***1,335,918*** | ***130,000*** | ***0*** | *10* |
| **Dhexe** | | | | |
| **Galgaduud** | 330,057 | 40,000 | 0 | 13 |
| **Mudug** | 350,099 | 30,000 | 0 | 10 |
| **ISKU-DAR** | ***680,156*** | ***70,000*** | ***0*** | *12* |
| **Koonfur** | | | | |
| **Bakool** | 310,627 | 145,000 | 25,000 | 55 |
| **Baay** | 620,562 | 285,000 | | 46 |
| **Gedo** | 328,378 | 70,000 | 160,000 | 70 |
| **Hiiran** | 329,811 | 95,000 | 30,000 | 38 |
| **Jubbada Hoose** | 385,790 | 45,000 | 90,000 | 35 |
| **Jubbada Dhexe** | 238,877 | 40,000 | 120,000 | 67 |
| **ISKU-DAR** | ***2,214,045*** | ***680,000*** | ***425,000*** | *50* |
| **WADAR** | **4,230,119** | **880,000** | **425,000** | *31* |
| **Qiyaasta la qiimeeyey iyo ta ku meelgaadhka ah ee dadweynaha ku jira XCHAX ama GB** | | **1,305,000** | | *17* [7] |
| **Dadweynaha Magaalooyinka ee jooga Goobaha ay Xiisaddu ka taagantahay ee Koonfurta** [4] | | **40,000** | | *1* [7] |
| **Isku-darka qiyaasta Dadweynaha Magaalada iyo qiyaasta ku meelgaadhka ah ku jira XCHAX iyo GB** | | **1,400,000** [5] | | *19* [7] |
| **Qiyaasta Tirada Dadka Barakacay** [6] | | **400,000** | | *5* [7] |
| **Qiyaasta Wadarta Dadweynaha ku jira xiisad** | | **1,800,000** | | *24* [7] |

[1]Waxa soo saaray: Qiyaasta Dadweynaha oo Heer Gobol/Degmo, UNDP Soomaaliya, bisha Siddeedaad 1, 2005. Xusuuso qiyaastan waxa ku jira oo keliya tirada gobollada saamoobay. FSAU ma soo koobto qiyaasaha dadweynaha maaddaama ay yihiin qiyaasaha rasmiga ah ee UNDP.
[2]Qiyaasta waxa lagu soo koobay shanta kun ee ugu dhow, waxana ay ku salaysantahay tirada dadka deggan laakiin lama tixgelin guuritaanka hadda iyo ka la filyo, waxana weheliya dadweynaha ku jira Halis Sare ee ku sugan XCHAX ama GB waxana qiyaasahan loogu talagalay in loo isticmaalo qorshaynta.
[3]Degmada Dan-Gorayo waxay ka tirsantahay Gobolka Bari kadib markii ay sidani hore u dhacday ka hor xogta dadweynaha ee UNDP/WHO 2005.
[4]Qiyaastii waa illaa 30% iyo 20% dadwynaha magaalooyinka ee ku jira GB iyo XCHAX sida ay u kala horreeyaan.
[5]Tirada dhabta ahi waa 1,345,000, hase yeeshee, waxa lagu soo koobay 1,400,000 taasoo loogu talagalay qorshaynta iyo fududaynta war gaadhsiinta.
[6]Waxa soo saaray: UN-OCHA warbixinta oo la cusboonaysiiyey bishii Afraad 2004 (376,630) iyo khariidadda Dadka Gudaha Ku Barakaycay ee UNHCR bishii Labiyo-tobnaad 2005 (407,000), oo lagu soo koobay 400,000 qiyaas ahaan.
[7]Qiyaasta boqolkiiba ee wadarta dadweynaha Soomaaliya oo ah 7,502,654 (UNDP/WHO 2005).

**Khariidadda 1: Falanqaynta Xaaladda Hubinta Cuntada ee Soomaaliya: Saadaasha Guga 2006 Kadib, bisha Toddobaad 2006 Ilaa bisha Labiyo-tobnaad 2006**



# ARRIMAHA UGU MUHIIMSAN GOBOLLADA

## • GOBOLLADA KOONFURTA

Koonfurta Soomaaliya waxay ku waddaa inay ku jirto hubin la'aan cuntada, nafaqada iyo hab-nololeedka ah. Qiyaastii **1.1 malyuun oo qof oo jooga Gobollada Gedo, Jubbooyinka, Baay, Bakool iyo Hiiran** ayaa lagu tilmaamay inay ku jiraa **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo aad u xun** ama **Gurmad Bina-aadamnimo** oo u baahan gargaar bina-aadamnimo oo degdeg ah iyo taageero hab-nololeedka ah (**Khariidadda 1** iyo **Sanduuqa 1**). Tiradan, **425,000 waxay ku jiraan Gurmad Bina-aadamnimo 680,000 oo qofna waxay ku jiraan Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah**. Hase yeeshee, xaaladdu hore ayay u martay taniyo falanqayntii Deyrtii '05/06, taasoo ku muuqata in 50% ay is yaraatay wadarta dadwynaha ku jira Gurmad Bina-aadamnimo ee jooga koonfurta (tiradaas oo hoos uga soo dhacday 915,000 Deyrtii '05/06).

Horumarka guud waxa kale oo uu ku muuqdaa Gobolka Gedo oo ka baxay heer diigniin hore ee Halis Dhexdhexaad. Dhinaca kale, waxa jirta in 60% ay kordheen tirada dadweynaha ku jira Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun waayo dadku waxay ka baxeen Gurmad Bina-aadamnimo waxana ay u gudbeen Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun. Waxana sii xumaanaysa xaaladda dadka gobollada Hiiraan iyo degmooyinka Badhaadhe iyo Kismaayo ee gobolka Jubbada Hoose. Gobolka Hiiraan qiyaastii 125,000 oo qof oo ah xoola-dhaqato, beer-iyo-xoola-dhaqato iyo hab-nololeedka webiyada ayaa iminka ku jira **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo aad u xun** 30,000 oo qof oo kale oo jooga goobaha webiyada iyo beero-iyo-xoola-dhaqataduna waxay **Halis Sare** ugu jiraan inay galaan xaalad ah G**urmad Bina-aadamnimo** inta ka horraysa bisha Laba-iyo-tobnaad 2006. Shabeellooyinka, beero-iyo xoola-dhaqatadu waxay ku jiraan **Digniin Hore oo Heer Indo-ku-hayn ah**, kadib dalagga roobka ku baxa markii lagu guulaysan waayay. Xaaladaha daaqa iyo biyaha ee goobaha dhaqan ahaan xooluhu ay daaqaanna way sii xumaanayaan.

Guud ahaan koonfurta, fursad-u-helidda cuntada iyo dakhliga wali culays ayaa saaran waayo waxa saamaynaya dhowr xilli oo soosaarka dalagga iyo xooluhu uu hooseeyey. Roobabkii Guga '06 ee gobollada koonfurta saamayntoodu way isku jirtaa iyadoo soo saarka dalaggu uu aad uga hooseeyo Ceceliska Dagaalka Kadib gobollada Bakool(55%), Gedo (62%), Jubbada Hoose (8%), Jubbada Dhexe (11%), iyo Shabellada Hoose (68%). Jubbooyinka qaar ka mid ah soo saarka aan caadiga ayn ee dhulka biyo fadhiisinka ah (oo badi ah sisin iyo digir ah dalagga lacagta naqadka ah laga helo) waxa la filayaa inay go'aan dhammaadka bisha Tobnaad iyo wixii ka dambeeya. Soosaarka hadhuudhka roobka ku baxa ee dhulka ugu fiican ee gobolka Bay iyo galayda la waraabiyo ee Shabeellada Dhexe waxay ku dhowayihiin Ceceliska Dagaalka Kadib (97% iyo 99% siday u kala horreeyaan). Qiimaha dalagga ee suuqyo muhiim ah oo la tixraacaa wuxuu billaabay inuu hoos uga dhaco heerarkii aadka u sarreeyey, kadib billowgii goynta dalagga ee gobolladaqaar, iyo gudbinta cuntada gargaarka ee gobollo kale oo uu soosaarkoodu liito. Hase yeeshee, qiimaha dalagga waxa la filayaa inuu ku wado inuu sarreeyo waayo heerarka kaydka oo hooseeya dhammaan koonfurta kadib 3 xilli oo uu sosaarka dalaggu liitay.

Xaaladaha xoola-dhaqatadu iyana way kala duwantahay gobollada. Helitaanka Biyaha iyo daaqu wuxuu u dhexeeyaa goobo caadi ah iyo kuwo ay wanaagsanyihiin koonfurta Gedo, gobolka Baay iyo goobo ka mid ah Jubbooyinka, laakiin way liitaan Hiiraan, Bakool,waqooyiga Gedo iyo dhuhlka xeebaha iyo beero-iyo-xooladhaqatada shabeellooyinka. Goobaha ku jira Gurmad Bina-aadamnimo**,** abaar dabadheeraatay culayskeeda ayaa keenay heerar hoose oo dhalmada xoolaha iyo soosaarka caanaha ah, gaar ahaan lo'da iyo adhiga. Soosaarka caanaha oo liitaa maaha saamaynta keliya ee ay arrimahani ku leeyihiin kala duwanaanta cuntada iyo nafaqada ee waxa kale oo ay taabanayaan dakhliga, marka iibka soosaarka xooluhu uu hoos u dhaco.

Waxa walaac leh, in Gugan 2006 heerka rimidda lo'da iyo adhiga ee waqooyiga Gedo, Jubbooyinka, Baay, Bakool iyo Hiiraan ay hosayso taasoo six un u taaban doonta soosaarka xoolaha (iyo helitaanka caanaha) xiliyada soo socda. Sida sare ee ay xooluhu u dhinteen muddadii bishii Afraad 2005 illaa bishii Saddexaad 2006, gaar ahaan lo'ada iyo adhiga (40-60% ayaa dhintay lo'da gobolka Gedo, Jubbooyinkana lo'da dhimatay waa 40-55% ), macnaheedu waxa weeye in mudada dib-u-soo-kabashada ee xoola-dhaqatada, gaarahaan lo' dhaqatada, inay qaad doonto dhowr sannadood xitaa haddii xilliyada dambe ay fiicanaadaan.

Qiimaha lo'da ee kordhayaa wuxuu muujinaya horumarka xaaladda jidhka xoolaha, inkastoo qiimuhu uu wali ka hooseeyo heerarkii abaarta ka hor. Tani waxay hore u marisay guud ahaan iswaydaarsiga ganacsiga iyo fursad-u-helidda cuntada ee xoola-dhaqatada, inkasta oo uu qiimaha dalaggu wali sarreeyo dhammaan gobollada koonfurta. Qiimaha sare ee dalaggu wali wuxuu ku wadaa inuu koobayo fursad-u-helidda dalagga ee qoysaska saboolka ah oo ku tiirsan inay suuqyadaka iibsadaan. Iyadoo waxtarka xooluhu uu liito, heerarka deyntu way ku sii kordhaysaa qoysaska oo iibsada cuntada aasaasiga ah iyo biyaha xoolaha. Heerarka nafaqa-darrada ee Gedo, Jubbooyinka, Baay iyo Bakool waxay ku wadaan inay aad uga sarreeyaan heerarka caqli galka ah.

## • GOBOLADA DHEXE

Galgaduud iyo koonfurta Mudug oo ah dhul hore uga soo kabanaya **Gurmad Bina-aadamnimo** waxay ku jiraan **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun** inkasta oo xaaladdu ay sii xumaanayso. Tani waxay ku muuqata inay korodhay tirada dadweynaha ku jira **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun** oo ay gaadhay qiyaastii 70,000 oo qof (waxay ka korodhay 10,000 oo qof qiimayntii Deyrtii '05/06).

Qiimayta guduhu waxay xaqiijinaysaa in guud ahaan roobabka da'ay ay caadi ka hooseeyeen, meelaha qaar ku koobnaayeen iyo inay liiteen goobaha lagu tilmaamay inay ku jiraan Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun . Goobaha xoola-dhaqatada, helitaanka biyaha iyo xaaladda daaqu way liitaan (marka laga roobo goobo ku yaalla degmooyinka Balanbaalle Iyo Xarrardheere). Xaaladda jidhka ee dhammaan xooluhu way liidataa waanay sii xumaanaysaa.

Goobaha aan helin roobab fiican, tartanka loogu jiro saadka la helayo (iyo xoolaha ka soo guuray Wardheer, Gobolka Soomaalida ee Itoobiya dartood) waxay keeni doontaa in si degdeg ah loo dhammeeyo saadka cowska iyo biyaha. Nabad-la'aanta ka jirta Hobyo, Xarrardheere, Cadaado iyo Gellinsoor waxay ku waddaa inay qasayso hab-nololeedka xoola-dhaqatada, barakacinayso dadka, abuurayso in tiro badan oo dadka barakay ay meelo isugu uruuraan iyo inay qasayso gancasiga gobolka gudihiisa iyo gobollada dhexdoodka.

## • GOBOLLADA WAQOOYIGA

Waxa jirta in si weyn uu u soo kabanayo hab-nololeedka xoola-dhaqatadu afartii xilli ee u dambeeyey Nugal, Sool, iyo bariga Hawd, goobahaas oo sannadihii 2002-04 ay ku dhaceen abaarihii dabada dheeraa ee ugu xumaa. Waxay abaarahaasi kaloo kordhiyeen xiisadda cimilada (eeg Lifaaqa 5.1.3 iyo 5.1.4, Falanqaynta Dayrta Kadib '05/06, si aad u heshid faahfaahinta. Hase yeeshee, goobahaasi wali waxay ku jiraan xaalad ah **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun,** inkastoo dadwynaha xaaladdan ku jiraa ay yihiin **qiyaastii 100,000 oo qof** haddana waa kala badh qiyaastii qiimayntii Deyrta '05/06.

Goobaha qaar ka tirsan degmooyinka Xuddun iyo Taleex ee gobolka Sool, qaybo ka mid ah Sanaag, iyo Togdheer, roobabkii Guga '06 caadi way ka hoosyeen, taasoo hakin doonta dib-u-soo-kabashada xoola-dhaqatada degmooyinkaas. Goobo ka tirsan degmooyinka Qandala, Caluula iyo Iskushuban ee Waqooga bari ee gobolka Bari, waxa lagu tilmaamay inay ku jiraan heerar dig-niin hore oo **Indo-ku-hayn ah** falanqayntii Deyrtii '05/06, iyo xeebaha kalluumaysiga ee degmooyinka Eyl iyo Jariiban oo iminka loo arko inay ku jiraan **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun** (**Khariidadda 1**). Sidaas darted, wadarta tirade dadka ku jira **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun** gobollada waqooyiga qiyaastii waa **130,000** oo qof.

Goobaha helay roobab caadi ka hooseeya Guga '06, helitaanka biyaha iyo daaqu waxay isugu jiraan inuu liito ama caadi yahay. Heerarka iibinta xoolaha iyo deyntu way kordheen sida laga soo sheegay goobahaas si loogu bixiyo kharashka biyo dhaaminta xiliga Jiilaalka. Hoos u dhac ku yimi dakhliga xilliga kaluumaysiga (bishii Tobnaad '05 illaa bishii Afraad '06) iyo soosaarka fooxa ama lubaanta (dhulka xoola-dhaqatada ee Gaagaab ee gobolka Bari) taasina waxay sii xumaysay hoos-u-dhaca guud ee xaaladda hubinta cuntada iyo hab-nololeedka ee goobahaas. Dhulka Hawdka ee galbeedka degmooyinka Burtiinle iyo Galdogob, iyo Hawdka Hargeysa waxay ku jiraan heer digniin hore oo **Indho-ku Hayn ah** helitaanka biyaha iyo daaqa oo liita dartood waxana la arkay guuritaan xoolaha ah oo aan caadi ahayn. Labadaas gooboodba waxay u baahan doonaan in aad isha loogu hayo lixda bilood ee soo socda.

# TILMAAMAHA UGU MUHIIMSAN QAYBAHA

## • CIMILADA

Guud ahaan, dhammaan Soomaaliya roobabka xilliga Guga'06 waxtar koodu wuu isku jiray, marka la eego baaxadda roobabka iyo meelaha ay ka da'een labadaba. Roobabku hore ayay u bilaabmeen baaxaddooduna way fiicnayd (dhammaadkii bishii Saddexaad ayay billaabmeen halkii ay ka di'i lahaayeen badhtamaha bishii Afraad) gobollo badan oo ay ku jiraan kuwa ay abaartu saamaysay ee Jubbooyinka Gedo, Baay, Bakool, Shabeellooyinka, iyo qaybo ka mid ah gobollada Dhexe iyo Waqooyiga galbeed. Hase yeeshee, xilliga Guga intii lagu jiray roobabku siday u da'ayeen may toosnayn, ee goobaha qaar ayay ku koobnaayeen ama way kala go'ayeen.

Gobollada Jubbooyinka iyo Dhexe, inkastoo Sawirka Sata-laytku uu muujinyo in wadarta isku-darka roobka ee xiliga Gugu ay aad uga sarrayso caadi (**Khariidadda 2**), haddana warbixinaha guduhu waxay xaqiijinayaan in akhriska sata-laytku uu tiro dheeraad ah sheegayo waay daruuro ayaa isku gudbay. Badi roobabkuna waxay da'een dabayaaqadii bishii Saddexaad iyo billowgii bishii Afraad. Gobollada Bakool iyo Hiiraanba, warbixinaha guduhu waxay xaqiininyaan in roobabku ay caadi ka hooseeyeen xiligii Guga oo dhan. Gobollada ay roobabku sii da'yeen ee ay si siman u da'een dhammaan xiliga Guga waxa ku jira Baay, Awdal iyo qaybo ka mid ah Bari, Sanaag, Sool iyo Togheer. Roobabku siday uga da'een gobollada Waqooyiga Bari ee Kiiniya badi waa caadi, Gobolka Soomaalida ee Itoobiyana waxtarkoodu wuu isku jiray iyadoo ay liiteen roobabka ka da'ay dhulka soohdinta ee laga billaabo briga Bakool illaa Togdheer.

**Khariidadda 2: Boqolkiiba Roobaka Roobka Day: bilii Afraad-Shanaad-Lixaad '06**




Waxa soo saaray : USGS/FEWS NET

## • BEERAHA

Soosaarka dalagga Guga '06 ee koonfurta Soomaaliya, oo lagu qiyaasay illaa 113,000 MT, waa 71% oo keliya Celceliska Dagaalka Kadib ee Guga (1995–2005), sababta ugu weynina waa roobabka oo caadi ka hooseeya oo si simanna aan u di'in. Inkastoo sannadkan Soosaarka Gugu uu aad uga fiicanyahay sannadkii hore (soosarkii dalagga Gugii '05 wuxuu ahaa kii ugu hooseeyey muddo toban sano ah isago ah 44% oo keliya Celceliska Dagaalka Kadib), xiligan Guga soosaarku waa kii saddexaad ee ugu hooseeyey muddo toban sano ah. Labada dalag ee ugu muhiimsan, soosaarka hadhuudhku wuu ka fiicnaa sidii hore (87% Celceliska Dagaalka Kadib ee soosaarka hadhiidhka) goynta dalagga oo fiicnayd gobolka Baay oo soosaarka hadhuudhka muhiim u ah. Dhinaca kale, soosaarka galayda ee Gugu waa 60% oo keliya Ceceliska Dagaalkii Kadib sababtoo ah waxa lagu guulaysan waayay galayda roobka ku baxda ee Shabeellooyinka iyo iyadoo si buuxda loogu guulaysan waayay soosaarka dalagga Hiiraan (31% Celceliska Dagaalkii Kadib), Jubbada Hoose (8% Celceliska Dagaalka Kadib), and Middle Juba (11% Celceliska Dagaalkii Kadib).

**Sanduuqa 2: Qiyaasta Soosaarka Dalagga Guga '06 - Koonfurta Soomaaliya**

| Gobolka | Soosaarka Guga 2006 oo ah Mt | | | Guga 2006 oo ah % Gugii 2005 | Guga 2006 oo ah % Guyaashii Dagaalka ka Dib |
|---|---|---|---|---|---|
| | Hadhuudh | Gallay | Wadarta dalagga | | |
| Bakool | 1,230 | 195 | 1,425 | 146% | 55% |
| Baay | 35,400 | 2,740 | 38,140 | 296% | 97% |
| Gedo | 2,959 | 1,517 | 4,476 | 827% | 62% |
| Hiiran | 886 | 560 | 1,446 | 1033% | 31% |
| Jubbada Hoose | 40 | 493 | 533 | 63% | 8% |
| Sheeballada Hoose | 4,500 | 42,560 | 47,060 | 128% | 68% |
| Jubbada Dhexe | 280 | 815 | 1095 | 32% | 11% |
| Shabeellada Dhexe | 7,650 | 11,050 | 18,700 | 92% | 99% |
| Wadarta | 52,945 | 59,930 | 112,875 | 149% | 71% |

Waxa soo saaray: Baadhitaanka Soosaarka dalagga Guga '06 ee FSAU

Galayda la waraabiyo ee goobaha ugu badan soosaarka gallayda ee Gobollada Shabeelada Hoose iyo dhexe waxay matalaan badi soosaarka gallayda ee xiligan Guga (69% iyo 86% Celceliska Dagaalka Kadib siday u kala horreeyaan). Roobabka oo si aan sinnayn u da'ay, daadad iyo dirxi badan oo ku dhashay ayaa keenay in xilligii saddexaad aan lagu guulaysan dalagga gobollada Jubbada Hoose iyo Dhexe (Ka yar 10% Celceliska Dagaalka Kadib). Labada bilood ee soo socda, soosaarka dalagga caadiga ka baxsan ee laga beero dhulka biyo-fadhiisinka ah (dhesheegga) waxa la filayaa in laga helo 3,200MT oo dheeraad ah (soosaarka dalagga *Guga* '06 waa 1,700 MT oo keliya Jubbada Hoose iyo Dhexe marka la isku daro). Abuuritaanka dalagga ee soosaarka Guga/Karanta waqooyiga galbeed waxa lagu qiyaasay illaa 20,000MT, taasoo ah 118% Celceliska Dagaalka Kadib (1998–2005).

Qiimaha dalaggu wuxuu halkii ugu sarraysay gaadhay bishii Shanaad – bishii Lixaad '06 isagoo ka jawaabaya saadka dalagga ee hooseeyey kadib soosaarka dalka oo liitay Gugii '05 iyo Deyrtii '05/06 (qiimuhu wuxuu kordhay illaa 100-200%). Hase yeeshee, qiimuhu wuxuu billaabay inuu hoos u dhaco gobollada qaar maaddaama dalaggii go'ay Gugu uu gaadhay suuqyada. Gobolka Baay oo soosaarka Gugu uu ku dhowaa Celceliska Dagaalka Kadib, qiimaha hadhuudhku wuxuu hoos u dhacay 17% intii u dhaxaysay bishii Shanaad iyo bishii Toddobaad, iyadoo qiimaha galayda ee Shabeelooyinkuna uu hoos u dhacay 28% isla mudaddaas.

**Khariidadda 3: Soomaaliya: Baaxaa-degga Guuritaanka Xoolaha, bilaha Saddexaad – Toddobaad '06**




Marka la eego guud ahaan kaydka dalagga ee hooseeya, oo ay weheliyaan soosaarka dalagga oo liita, qiimaha dalagga lama filayo inuu ku wado inuu hoos u dhaco waxana laga yaabaa inuu billaabo inuu kordho mar kale labada ama saddexda bilood ee soo socda gudahooda. Jubbada Hoose iyo Dhexe, oo soosaarka dalagga Guga '06 badi lagu guulaysan waayay, qiimaha dalaggu 50% ayuu hoos u dhacay labadii bilood ee la soo dhaafay, intuu u dhaxaysay Bishii Shanaad iyo bishii Toddobaad. Haseyeeshee hoos u dhacan waxa u sabab ah cuntada gargaarka ee laga qaybiyey gobolkaas.

Xisaab-xidhka Sannadkii ee Dalagga oo qiyaas ah (bisha Lixaad '06 – bisha Shanaad '07) ee Soomaaliya, iyadoo la isticmaalyo qiyaasaha soosaarka dalagga Guga '06 iyo iyadoo la malaynyo celceliska Dagaalka Kadib ee Deyrta '06/07 ee soo socota, wuxuu muujinyaa inaanu hoos u dhici doonin dalggu marka lagu daro cuntada gargaarka ah ee jidka ku soo jirta ama lagu balanqaaday illaa bisha laba-iyo-tobnaad '06. Tani sidan ayay ahaanaysaa xitaa haddii la maleeyo dhacdooyin kala duwan oo la xidhiidha Ganacsiga dibedda laga keeno. Wadarta dalagga dheeraadka ah ee la qiyaasay waxay u dhaxaysaa 20 - 115 MT, taasoo ku xidhan malayn kala duwan oo la xidhiidha Gacansiga Dibedda laga keeno.

## • XOOLAHA

Guudahaan, gobollada ay abaarto saamayso ee Gedo, Jubbooyinka, iyo Baay, xaaladda jidhka xooluhu hore ayay u maraysaa waayo waxa kordhay helitaanka daaqa iyo biya ee meelaha qaar kadib roobabkii Guga '06. Qiimaha xoolaha gaarahaan lo'du wuu kordhay saddexdii bilood ee la soo dhaafay, iswaydaarisga ganacsiguna (xoolaha iyo dalagga) hore ayuu u maray .

Hase yeeshee xoolaha dhintay abaarta darteed aad ayay u badnaayeen gobollada Gedo, Jubbooyinka, Bakool iyo Baay. Waxa lagu qiyaasay in tirada lo'du intii u dhaxaysay bishii Shanaad '05 iyo bishii Lixaad '06 ay hoos u dhacday 40-60% gobollada Gedo iyo Jubbooyinka, Bakool iyo Baayna waxay hoos u dhacday 15-25%. Lo'da hadhay, xaaladda jidhkoodu waxa ka muuqata calaamado horumar ah, laakiin rimidda iyo dhalmaduba aad ayay u hooseeyaan, taasoo ay macnaheedu tahay in soosaarka caanuhu uu hoosayn doono iyo in dib-u-soo kabashada xooluhu ay qaadan doonto dhowr sannadood.

Dhulka miyiga ah ee Jubbooyinka, inkastoo uu jiro cows haddanna dhammaan biyo galeennadu horeba way u qalaleen. Tani waxay keentay in tiro badan oo xoola-dhaqatada ahi ay si aan caadi ahayn ugu guureen dhulka webiyada ee gosha iyo gendiga leh. Taasina waxay keeni doontaa inay cuddurro ku dhici karaan iyo in xoola-dhaqatada iyo beeralayda ay colaadi dhex marto ku saabsan fursad-u-helidda biyaha webiga iyo tartan loogu jiro saadka gabaabsiga ah. Sidoo kale, roobabku way liiteen waqooyiga Gedo iyo Bakool, taasoo keenaysa in si aan caadi ahayn loo guuro Soomaaliya dhexdeeda iyo soohdimaha Itoobiya iyo Kiiniya.

Gobollada Hiiraan iyo Dhexe, xaaladda xoolaha gaar ahaan lo'du way liidataa waxana la filayaa inay sidan ka sii xumaato afarta bilood ee soo socda waayo waxa kooban daaqa, biyaha iyo fursadaha guuridda kadib saddex xilli oo is xigay oo roobabku ay caadi ka hooseeyeen gobolladaas. Heerarka rimidda iyo dhalmada iyo soosaarka caanuhuna way hooseeyaan. Si aan caadi ahayn ayaa loogu guurayaa dhulka webiyada illaa Shabeellooyinka iyo Itoobiya. Dhinaca waqooyiga bari, guud ahaan xaaladda jidhka xooluhu waxay isugu jirtaa inay fiicantahay ama caadi tahay, iyadoo heerarka rimidda iyo dhalmadu ay yihiin caadi, sidaas darted soosaarka caanuhu waa caadi. Waxa intaas raaca, tirada xooluhu waxay ku waddaan inay kordhayso, gaar ahaan waqooyi bari. Qiyaasta laga soo qaatay baadhitaanka isbedelka tirada xoolaha ee qiimayntii Guga, intii u dhaxaysay bishii Afraad '05 – bishii Saddexaad '06 waxay sheegaysaa in tirada geela iyo adhigu ay kordheen 30-40% iyo 10-20% siday u kala horreeyaan. Heerarka guuritaanku badi waa caadi marka laga reebo goobo ka tirsan xeebta Deex, buuralayda Bari iyo dhulka Howdka ee dheraran soohdinta Itoobiya.

## • SUUQYADA

Guud ahaan, Shilinka Soomaaliya (SoSh) iyo Shilinka Soomaalilaandba (SlSh) si joogta ah ayay u xasilloonaayeen sannadkii iyo badhkii la soo dhaafay (doolarka Markaykanku wuxuu u dhigmaa illaa15,500 oo Shilinka Soomaaliya ah iyo 6,300 oo shilinka Soomaalilaand ah). Hase yeeshee mudaddan xasiloonida ahi way dhammaatay, markii qiimaha Shilinka Soomaaligu uu suuqyada Koonfurta Soomaaliya kordhay 14% marka loo eego doolarka Maraykanka intii u dhaxaysay bishii Koowaad iyo bishii Saddexaad '06 (hoos ayuu dhacay doolarka sarrifkiisu oo wuxuu noqday 13,300 oo shilinka Soomaaliga ah bishii Saddexaad '06). Hase yeeshee bishii Toddobaad '06 qiimaha Shilinka Soomaaligu hoos ayuu u dhacay waxana iminka lagu sarrifaa illaa 14,400, iyadoo qiimaha ku kordhay bishii Kowaad '06 uu ahaa 6% oo keliya.

Inkastoo Shilinka Soomaaligu uu sidii hore ka adagyahay qiimaha cuntada laga keeno dibedda, gaar ahaan sonkorta, bariiska iyo saliidu wali wuu sarreeyaa badi suuqyada gobollada ugu waaweyn. Wababtoo ah dhowr arrimood oo ay ku jiraan iyadoo dhowr gobol (Jubbooyinka) ay kordheen tirada waddooyinka caqbadaha lagu gudbay; qas ku yimi socodka alaabooyinka dibedda laga keeno ee dekadaha badda la soo mariyo (Kismaayo), qas ku yimi saadka gobollada colaad iyo nabad la'aan darted (gobollada Dhexe), iyo guud ahaan qiimaha gaadiidka oo kordhay waayo waxa kordhay qiimaha shiidaalka ee adduunka. Dib-u-furidda dekedda weyn ee Muqdishu (waa markii u horraysay ee la furay taniyo 1995) waxa weeye inay fudidayso soo gaadhidda badeecadda dibedda laga keeno. Hase yeeshee, colaad balaadhani haddii ay dhacdo dhammaan gobollada koonfurta iyo dhexe, khadadka gobollada iyo khadadka ay saadka dekeddu maraan si wayn ayay u qasmi doonaan, taasina si xun ayay u taaban doontaa socodka iyo qiimaha badeecadda.

## • NABAD L'AANTA

Colaad degmooyinka qaar ku kooban ayaa ka jirta goobo hadda lagu tilmaamay inay ku jiraan **Gurmad Bina-aadamnimo** iyo **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun** waxana ay ku waddaa inay sii xumaynayso hubin la'aanta cuntada, nafaqada iyo hab-nololeedka. Inkastoo ay diifteedu ku koobantahay goobaha qaar, haddana dhowr goobood ayay soo foodsaartay colaadi xiligii Guga taasoo keentay burbur hantida hab-nololeedka ah, fursad-u-helidda hantida waxsoosaarka leh oo yaraatay, iyo barakac. Goobaha ay colaadu ku koobantahay waxa ku jira Maxaas, Jalalaqsi, Buulo Burti (Gobolka Hiiraan); Badaadhe, Kangiroon iyo Beerhane (Degmada Kismaayo,

**Khariidadda 4: Natiijada Nabad la'aanta iyo Hubinta Cuntada, Nafaqada iyo Hab-nololeedka: bilaha saddexaad - Toddobaad '06**



qiimaynta guga kadib

Jubbada Hoose) ; Karaban (Degmada Luuq, Gobolka Gedo); iyo Kalabaydh iyo Dabaltaag (Degmada Laas-caanood, Gobolka Sool). Gobollada Dhexe markani waa kii saddexaad ee xilliga roobka ee ay colaadi ka dhacday hareeraha Caadado, Gelinsoor, Hobyo, Xarardheere iyo Ceel Buur taasoo keentay inay si weyn u qastay daaqa iyo guuritaanka xoola-dhaqatada (eeg Taxanaha Farsamada Lambar IV. 7 iyo 8). Diifta kale ee gaadhaysa goobo ka baxsan colaadani waa qaska ku imanaya socdka ganacsiga ka dhexeeya Muqdishu iyo Galkaacyo iyo dadweynaha oo u barakici doona meelaha ay ka helayaan taageero qabiil iyo hab-nololeed.

Waxa walaac si kordhaya keenaysa inay ka dhici karto colaad balaadhani dhammaan gobollada koonfurta iyo gobollada dhexe taasoo ka imanaysa xidhiidhka ka dhexeeya dawladda federaaliga ah ee ku meelgaadhka ah iyo Midowga Maxkmadaha Islaamigga ah. Haddi xiisadda siyaasaddu ay korodho oo ay keento colaad balaadhan iyo inuu qasmo ganacsiga ka dhexya gobolladu, si aad u xun ayay u saamayn doontaa xaaladda bina-aadamnimada (eego bogga 1).

- **NAFAQADA**

Sida uu sheegayo qaabka baadhidda nafaqadda ee FSAU iyo qiimayntii nafaqada ee dhowaan ay sameeyeen FSAU iyo hay'adaha ay isbahaystaan, badi goobaha hadda lagu tilmaamay inay ku jiraan **Gurmad Bina-aadamnimo** ama **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun**, heerarka nafaqa-darradu aad ayay u xunyihiin, oo waa 15% iyo ka badan (culayska oo loo eegayo dherarka qof < -2 ama cago barar) **(Khariidadda 1)**. Xitaa waxa intaas ka warwar badan goobaha ku jira Gurmadka Bina-aadamnimo ee Gedo iyo qaybo ka mid ah Jubbooyinka, waxa ka jira heerar nafaqa darro oo ka badan 20% (culayska oo loo eegayo dherarka qof < -2 ama cago-barar).

Goobahaasi, xaaladda nafaqa-darradu aad ayay u xumaatay taniyo bishii Koowaad ee '06 iminkana way ka xuntahay heerka mudada dheer (Baardeere oo ah gobolka Gedo, iyo Saakow, Bu'aale iyo Afmadow oo ah Jubbooyinka).

Tilmaamaha hore waxay muujinayaan in xaaladu ay sii xumaanayso taasoo ku muuqata heerarka nafaqa-darrada oo sii kordhaya xarumaha caafimaadka iyo xarumaha quudinta iyo nafaqaynta ee Mareeray iyo Xuddur lixdii bilood ee la soo dhaafay. Qodobbada waaweyn ee sii xumaynaya xaaladda hadda ee adag waxa ka mid ah cuntada oo aan ku fillayn iyo dhacdooyinka cudurrada oo aad u sarreeya. Labadaas arrimood waxay la xidhiidhaan fursad-u-helidda cuntada, biyaha badbaadada qaba iyo adeegyada daryeelka caafimaadka oo kooban.

**Khariidadda 5: Bolqolkiiba Roobka Caadiga aha: Bilihii Afraad-Shannaad-Lixaad '06**




**Warbixinaha dhowaan la daabacay iyo kuwa soo socda**

*Warbixinta Nafaqada ee FSAU, bisha saddeedaad 2006*
*Warbixinta Xogta Suuqyada ee FSAU/FEWSNE, bisha Siddeedaad 2006*
*Warbixinta Xogta Cimilada ee FSAU/FEWSNET, bisha Siddeedaad 2006*
*Taxanaha Farsamada ee FSAUFalanqaynta Guga 2006 Kadib, oo soo baxaya bisha Sagaalaad 2006*
*War saxaafadeedka FSAU, June 2, 2006 iyo bisha Siddeedaad 15, 2006*

***FAAD RAAC:***
*Daabacaadaha kor ku xusan waxa laga helaya Websaytka FSAU: www.fsausomali.org*

Technical & Managerial Support

Funding Agencies

European Commision

Kingdom of Norway

USAID

Technical Partners